



## Waxa ay ka yiraahdeen daryeelayaasha iyo hay'adaha Adeegyada Maalinta ee Dadka Waaweyn?

*“Aad ayay u fududahay in la idin la shaqeeyo! Waad ku mahadsantihiin waxa aad qabataan oo dhan!”*

*“Shaqaalaha waa kuwo naxariis badan oo daryeel leh.”*

*“Waa kuwo talefoonka dad ku caawiya uguna naxriista. Qoysaska iyo macaamiisha waxaa ay si heersare ah uga hadlaan shaqaalaha.”*

*“Waxaa ay had iyo jeer ula dhaqmaan si ixtiraam leh macaamiisha iyo qoyska.”*

*“Run ahaantii waxay jeceshahay waxqabadyada la bixiyo.”*

*“Waxqabadyada waa kuwo heersare ah. Waxaan jeclahay fasallada farshaxanka adeegsiga midabyada.”*

*“Waxay rabtaa in ay maalin walba tmaado!”*

*“Waxaan qabaa tani in ay tahay khayraad qiimo u leh macaamiishaada! Aad baad u mahadsan tahay!”*

*“Run ahaantii, barnaamijka la'aantiisa, waxaan aaminsanahay in aysan u suurtageli LAHAYN qayb ka mid ah macaamiisheyda in ay gurigooda joogaan. Waxaa intaa dheer, qayb ka mid ah daryeelayaasha in AYSAN awoodi lahayn in ay bixiyaan adeegyada CG.”*

*“Wayna la qoslaan. Oo ah wax aad muhiim u ah. Waxay dareensiin karaan raaxo marka ay la hadlayso.”*

*“Waa ay fiican yihiin marka aan u baahdo in aan kala hadlo shaqaalaha dhibaatooyinka/ arrimaha hooyadey haysta. Waxay ka baahi tiraan baahiyadeeda.”*

Hadaad rabto macluumaad badan oo ku saabsan Adeegyada Maalinta ee Dadka Waaweyn fadlan la xiriir xafiiska degaankaaga ee Adeegyada Bulshada iyo Guriga ama booqo mareegtada Adeegyada Maalinta ee Dadka Waaweyn: [www.dshs.wa.gov/adultdayservices](http://www.dshs.wa.gov/adultdayservices)

# Adeegyada Maalinta ee Dadka Waaweyn

*Adeegyada Maalinta ee Dadka Waaweyn waa barnaamijyo wakhtiga maalintii ah oo la kormeero.*

*Barnaamijyada waxay noqon karaan Daryeelka Maalintii ee Dadka Waaweyn (ADC) ama Caafimaadka Maalintii ee Dadka Waaweyn (ADH).*



Maamulka Taageerada Muddada-Dheer iyo Waayeelida



DSHS 22-1731 SM (8/17) Somali

## Daryeelka Maalintii ee Dadka Waaweyn (ADC)

ADC waxaa uu bixiyaa adeegyada aasaasiga ah ee loogu talagalay dadka waaweyn ee qaba xaalado caafimaad ama naafonimo ee aan u baahnayn waxqabadyada ama adeegyada Kalkaaliso Diiwaangashan ama Daaweeye Baxnaanin ruqsad haysta.

- Adeegyada daryeelka shakhsi
- Adeegyo bulsho oo ah si la-talin ah
- Kormeerka caafimaad ee joogtada ah ee RN
- Hawlaha daaweynta guud
- Waxbarashada caafimaadka guud
- Kormeer iyo ilaalin
- Gargaar gaadiidka ah
- Gargaarka degdegga ah
- Waxqabadyada madadaalada/bulshada
- Cunto nafaqeysan iyo cunto fudud
- Waxaa uu ka dhimayaa saacadaha CARE 30 daqiiqo saacad kasta oo la imaado, ilaa laba saacadood maalintii



## Kumaa xaq u leh ADC?

### Qof:

- Hadda haysta qiimeyn CARE
- Ku qoran ama ku jira COPES, RCL, New Freedom, ama maalgelin kale oo la ansixiyey, iyo
- Leh baahi aan la daboolin oo loogu talagalay hal ama in ka badan oo ah adeegyada aasaasiga ee soo socda:
  - Adeegyada daryeelka shakhsi
  - Kormeer caafimaad oo la socda la-tashiga RN
  - Hawlaha daaweynta guud
  - Kormeer iyo/ama ilaalin
  - Ku nool meel guri dhexdiisa ah

## Caafimaadka Maalintii ee Dadka Waaweyn (ADH)

ADH waxaa uu bixiyaa xanaaneyn xirfadeed iyo/ ama daaweyn baxnaanin marka lagu daro adeegyada aasaasiga ah ee laga bixiyo ADC.

- Dhammaan adeegyada aasaasiga ah ee ADC
- IYO
- Adeegyada xanaaneyn xirfadeed
  - Daaweyn xirfadeed: daaweynta jirka iyo baxnaanin shaqo, daaweynta baxnaaninta iyo dib-u-kabsashada, barashada, qiimeynta iyo daaweynta dadka hadalka ku adag, iyo qaybta daaweynta maqalka
  - Adeegyada la-talin taageero leh, maareynka kiiska
  - Gaadiid ayaa ku jira qiimaha maalin kasta
  - Wax isbeddel ah laguma sameyn karo saacaha CARE

## Kumaa xaq u leh ADH?

### Qof:

- Hadda haysta qiimeyn CARE
- Ku qoran ama ku jira COPES, RCL, new Freedom, ama maalgelin kale oo la ansixiyey
- Leh baahi aan la daboolin oo loogu talagalay hal ama in ka badan oo ah kuwan soo socda:
  - Xanaaneyn xirfadeed
  - Daaweyn xirfadeed
  - La-talin
- Ku nool meel guri-dhexdiisa ah, guri lagu xannaaneeyo waayeelka ama naafada ama guri qoys qaangaar ee aan bixin adeegga(adeegyada) loo baahan yahay